

Waa maxay sababta aysan jeerta ulahayn timo




✍ Basilio Gimo, David Ker

✎ Carol Liddiment


☞ Abdi Muse

🔊 2

💬 Soomaali so



Maalin maalmaha ka mid ah, Bakayle ayaa
socday wabiga qarkiisa.



Jeerta na waa ay joogtay, ayadoo u socoto damaashaad iyo cunnida xoogaa caws fiican oo cagaaran.



Jeerta ma aysan arkayn bakaylaha in uu joogo meeshaas waxayna si kama ah ayey ugu istaagtay cagti bakaylaha. Bakaylihii wuxuu bilaabay inuu ku qayliyo jeerta, "Adiga Jeer! Miyaadan arag in aad ku taagantahay cagtayda?"



Jeertii waxay raaligelisay Bakaylihi, "Waan ka xumahay, kuma aanan arkaynin, Fadlan i caf!" Laakiin bakaylihii ma dhageysan oo waxuu ku qeyliyay Jeertii, "Waxaad u sameysay kas! Maalin, un waad arki doontaa, in aad guddo!"

Bakaylihii waxuu raadiyay dab, wuxuuna ku yidhi, "Orod, soo gub Jeerta marka ay banaanka uga soo baxdo biyaha si ay u cunto caws. Way igu istaagtay!" Dabka ayaan ku jawaabay, "Dhib malaha, Bakayle, saaxiibkay. Wuxuu sameyn doonaa waxaad i weydiisay."





Xoga kadib, Jeertii waxay ka cunaysay caws
meel ka fog webiga marki, "bul!" Dab holac
isku badalay. Dabkii waxuu bilaabay in uu
gubo timihii Jeerta.



Jeertii waxay bilowday in ay ooydo oo u orado biyaha. Dhamaan timaheedi waxaa gubay dabki. Jeertii waa ay sii waday ooyinta, "Timahaygi waxa ay ku gubteen dabka! Timayhaygii dhamaan waay tageen, timahaygii qurux sanaa!"

Bakayluhu wuxuu ku faraxsanaa timaha Jeerta ee gubtay. Ilaa maantadan la joogo, cabsi dabka ay kaqabto, Jeerta marna kama fogaato biyaha.





Global Storybooks

globalstorybooks.net

Waa maxay sababta aysan jeerta ulahayn timo

Basilio Gimo, David Ker

Carol Liddiment

Abdi Muse

